Qofka haysta kaarkaan wuxuu leeyahay autism (kuwaasoo uu ka mid yahay Asperger syndrome)

Karkaan waxaa soo saaray Bulshada Austic-ga ah ee Qaranka (The National Autistic Society). Wuxuu kuu sheegayaa waxa aad ka filaneysid markaad la kulantid qof qaba autism.

Autism waa naafonnimo saameysa xirfadaha xiriirinta iyo bulshada.

Dadka qaba autism waxaa laga yaabaa iney si aan la saadaalin karin u dhaqmaan maxaa yeelay waxay dhibaato ku qabaan fahmidda xaaladaha bulsheed iyo luqaddaba.

Fadlan caawi adigoo u muujinaya fahmid iyo dulqaad.

Qofka qaba autism waxaa ku adag dhexgalka bulsheed, xiriirinta iyo qiyaaska, wuxuuna muujiyaa qaar ka mid ah astaamahaan:

Dhexgalka bulsheed

• Wuxuu u muuqdaa mid go'doonsan ama aan dan ka lahayn kuwa kale.
• Ma akhrin karayo luqadda baaqa jidh ahaaneed ama fahmo baahida tabta.
• Wuxuu u dhaqmaa si aan habbooneyn ama qaab daran.
• Wuxuu ka fogaadaa xiriirka indhaha marka uu wel welsan yahay ama cadaadis saaran yahay.
• Neceb yahay xiriir jidh ahaaneed.

Xiriirinta

• Waxaa laga yaabaa inuusan fahmin naaxiyadda codka, baaqyada ama cabbirrada wejiga sida weji kaduudka ama hinbiriirsiga.
• Wuxuu ereyada maldahan iyo waxyaabaha isku midka ah u qaataa si adag (sidaas awgeedna wuxuu 'wax xun u maleeyaa buraash' isla markaana wuxuu 'ilmo u qubeynta' u qaataa buraashyo iyo dhallaan).
• Way ku adag tahay inuu wada sheekeysi ku nagaado.
• Waxaa laga yaabaa inuu u muuqdo mid murmaya, madax adag, ama xanaaqsan...
• …ama dacwo badan, wax kastana iska oggolaada xataa haddii aysan run ahayn.
• Waxaa laga yaabaa inuu isticmaalo luqad toos ah, ama feejignaan badan sharciga siiye ah.
• Waxaa laga yaabaa inuu u muuqdo mid wax iskuma daye ah ama aan jawaab celis lahayn.
• Wuxuu noqon karaa daacad ilaa xaddi silloon ama af xumo leh ah.

Qiyaasidda

• Ma ifa-faaleyn karayo cawaaqibta falkiisa.
• Wuxuu aad uga wel-welaa is beddellada ama dhacdooyinka aan la fileynin.
• Wuxuu jecel yahay shuruucda la dejiyey, waxaana laga yaabaa inuu si xad dhaaf ah fal uga bixiyo marka ay dadku jebiyaan shuruucdaas.
• Badanaa wuxuu leeyahay xiiseyn gaar ah oo laga yaabo iney xasdid noqoto.
• Way ku adkaataa inuu arko ama qiyaaso aragtida uu qofka kale qabo.

Maxaa la sameeyaa haddii ay kula tahay in uu qof qabo autism

Dadka qaba autism-ku waxaa laga yaabaa iney si kala cad u hadlaan laakiin aan faham buuxa lahayn. Madax bannaanidooda qeexan waxay qarin karaysaa go'doonkooda iyo naafonnimadooda bulsheed.

Markaad la hadleysid qof qaba autism:

• marka ugu horreysa u sharrax waxa aad sameyn rabtid isla markaana xaqiiji iney fahmaan.
• isticmaal luqad fudud oo kala cad oo jumlooyin gaa-gaaaban leh.
• weydii su'aalo, gaar ah oo aan mugdi ku jirin.
• ka fogow sarbeeb, maldahaad ama isticaarooyin.
• qofka u oggolow waqti dheeraad ah si uu uga fekero ama tallaabo uga qaato waxaad sheegtay.
• xusuusnow in haddii asagu ama ayadu ay ka fogaanayaan xiriir indhood, aysan taasi tilmaameynin guurid ama ixtiraamo darro.

Qoraallo muhiim ah oo loogu talogalay aqoonyahannada sharciyeed ama caddaaladda denbiyeed

Qofka qaba autism waa qof nugul, haddii uu ahaan lahaan dhibbane, marqaati, ama kan laga shakiyey. Dhibaatada ay ku qabaan xiriirinta, dhexgalka iyo qiyaasiddu waxay ka dhigtaa kuwa aan faa'iideysan goortaasoo falalkooda iyo dhaqankooda si qaldan loo turjumi karo. Qof Weyn oo Habboon (Appropriate Adult) waa in loogu yeeraa inuu samafalkooda xafido.

Autism iyo **Asperger syndrome** waxaa lagu qeexaa iney yihiin qaladaad maskaxeed iyo mid hab dhaqaneed waxaa sidaa ku qeexay **Kala Saaridda Caalamiga ah ee Cudurrada ee Ururka Caafimaadka Adduunka (World Health Organization International Classification of Diseases, ICD10.) Markaas Sharciga Caafimaadka Maskaxda 1983 (Mental Health Act 1983)** ayaa laga yaabaa inuu ku dabbaqmo. Haddii ay kula tahay in qofka kuu xiran/kelyentigaaga/aad difaaceysid uu qabo autism, warbixin ka timid adeegga cudurrada dhimirka ee takhasuska leh ee wax ka qabta autism ama Asperger syndrome ayaa laga yaabaa iney dantooda iyo danta caddaaladduba ku jiraan.

Khadka Caawinta Autism-ka (Autism Helpline), 0845 070 4004 (ee furan Isniin – Jimce 10subaxnimo – 4galabnimo), wuxuu hayaa taxane takhasusleyaal ah oo khibrad u leh shaqada tan oo kale ah. Fadlan sidoo kale arag qaybta aqoonyahannada caddaaladda denbiyeed ee shabakadda Bulshada Autistic-ga ee Qaranka (National Autistic Society) ee **www.autism.org.uk/cjp**

Si aad war dheeraad ah u heshid

La xiriir Khadka Caawinta Autism-ka (**Autism Helpline**) 0845 070 4004 (ee furan Isniin - Jimce 10subaxnimo – 4galabnimo)

www.autism.org.uk

si aad war dheeraad ah oo ku saabsan kaarkaan u heshid, marka lagu daro qaybaha xaashidaan oo ku qoran luqado kale, fadlan eeg **www.autism.org.uk/card**

The National Autistic Society

© Bulshada Autistic-ga ah ee Qaranka (The National Autistic Society) 2005
Waa inaan dib loo soo saarin iyadoon la haysannin oggolaanshada

National Autistic Society
393 City Road, London EC1V 1NG
Lambarka samafalka ee diiwaan gashan. 269425